Waxyeelleynta
Cunsuriyadda ku Dhisan

WAA DENBI

Khadka Wargelinta
Shilka Cunsuriyadda
0800 0 8585 11

[Somali]

Waa maxay Waxyeelleynta ku dhisan?

Waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan waa fal wax u dhimid ama dhaqan uu sababay xukun u ridid cunsuriyadeed. Taas waxaa ku jira iska sii xukmin midabka maqaarka, dhalasho, asalka haybta iyo asalka dhaqaneed awgood.

Qaybo ka mid ah waxyeelleynta cunsuriyadda, sida fara xumeynta cunsuriyadda ku dhisan, af lagaaddada iyo hanjabaadaha qof kasta ayey caadi u yihiin. Noocyada kale ayaa laga yaabaa ineysan caadi la noqon, tusaale ahaan waxyeello loo geysto hantidooda, carruurtooda oo la "foorjeeyo" dacwado falal xun xun oo lagaa sameeyo iyo dhaqan "bulshada liddi ku ah". Mararka qaarkood shakhsiyaadka ayaa xataa la waxyeelleyn karaa xiriirka ay leeyihiin dad jinsiyado kala duwan ka soo jeeda awgii.

Caadi ahaan lahaydaa iyo ma ahaan lahaynaaba, waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan waxay sababi kartaa dareen caro, rajo beel, go'doon, caawino la'aan iyo cabsi. Haddii aad tahay dhibbane waa muhiim inaad ogaatid inaadan keligaa ahayn aadna caawin heli kartid.

Waa maxay waxa ay booliisku sidii waxyeelleyn cunsuriyad ku dhisan ula dhaqmaan?

Booliiska Nottinghamshire wuxuu si cad waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan ugu qeexaa:

"SHIL KASTA OO DHIBBANAHA SOO GAARA ASAGUNA U ARKA MID CUNSURIYADEED AMA QOF KASTA OO KALE"
(Waxaa soo saaray Xogwareysiga Stephan Lawrance).

Haddii aad adigu ama qof aad taqaanid, la mariyey nooc kasta oo waxyeelleyn cunsuriyadeed ku dhisan, booliiska ayaa wax uga qaban doona sidii shil cunsuriyadeed. Ma jiraan cid laga dhaafayo taas. Ma jiraan "haddiiyo" ma jiraan "laakiinno". Waxaa keliya oo aad u baahan tahay inaad ogaatid waa;

"HADDII AAD TIRAAHID WAA CUNSURIYAD, WAY TAHAY".

So sheeg waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan.

Dhibbaneyaal dhowr ah ee waxyeelleynta cunsuriyaddu waxay la yaabaan inuu shilku yahay mid aad u daran oo ku filan in booliiska lagu soo wargeliyo. Dhammaan waxyeelleyn cunsuriyadda ku dhisan waa kuwo daran. Ma ahan inuu qofna iska sii wato.
Booliiska Nottinhamshire iyo Nottingham & Golaha Sinnaanta Jinsiyadda Magaalada (RCE) waxay dhiirrigelinayaan ku soo wargeilnta booliiska dhammaan waxyeelleynada cunsuriyadda ku dhisan.
Waxaad shilalka cunsuriyadda ku soo wargelin kartaa telefoon, shakhsi ahaan, ama qoraal kuna soo wargeli saldhigga booliiska deegaanka. Waqtiyada deg degta mar kasta garaac 999. Markaad soo wargelisid shil abaabul ayaa la sameyn doonaa inuu sarkaal kuu yimaado. Taasina waxay ka dhici doontaa goob aad ku faraxsan tahay.
Shilalka cunsuriyadda qof kale beddelkaaga soo wargelin kara (tusaale.saaxiib ama qaraabo) ama markhaati.

Khadka Caawinta Shilka Cunsuriyadda (wicitaannada aan Deg-degta ahayn) 0800 0 85 85 11

Booliiska Nottingham wuxuu leeyahay khadka telefoonka caawinta oo bilaash ah oo loogu talogalay soo wargelinta shilalka cunsuriyadeed ee aan deg degta ah. Waxaad awooddaa inaad la hadashid saraakiisha kuwaasoo si gaar ah loogu tababaray iney wax ka qabtaan waxyeelleynta cunsuriyadda iyagoo weliba fahmaya dhibaatooyinka laga yaabo iney dadku kala kulmaan soo sheegidda shilalka. Tan waxaa ku jira wixii wel wel ah ee laga yaabo inaad ka qabtid sababidda waxyeelleyn kale ama in booliisku uusan wax weyn ka soo qaadin shilka.
Magacaaga inaad reebtid lagaagama baahna, laakiin wararka aad bixisid waxaa loo isticmaali karaa in lagu dhiso sawir halkaasoo laga yaabo in dhibaato ka jirto. Mararka qaarkood telefoonkaaga waxaa qaban doona ka jawaabaha telefoonka. Waxba ha ka wel welin. Saraakiisha ayaa dib kuula soo hadli doonta. Markay sidaa yeelaan, adiga ayuun bey si toos ah kuula hadli doonaan. Waxay ixtiraami doonaan waxa aad dooneysid ee la xiriira waxa marka xigta dhacaya.
Adeeggaan kalsoonida leh waxaa lagala soo xiriiri karaa **0800 085 85 11**

Hababka kale ee soo Wargelinta Shilalka

Haddii aad dareensan tahay inaadan awoodin inaad si toos ah booliiska u soo wargelisid, kooxaha mujtamaca deegaanka iyo ururradu iyagoo kaa wakiil ah ayey soo wargelin karaan (eeg Caawinooyinka Kale).

Caqabadaha Luqadda

Luqaddu uma baahna iney caqabad ku noqoto ku soo wargelinta shilalka booliiska. Booliiska Nottinghamshire wuxuu telefoon u diri karaa turjumaan ee in ka badan 100 luqadood waqti kasta ee maalintii.

Maxay tahay inaad ka filato Booliiska Nottinghamshire

- In booliisku si shakhsi ahaan ah kuu arkaan kuwaasoo diiwaan gelin doona isla markaana baari doona shilka. Haddii aad tiraahdid waa cunsuriyad, sarkaalku taa wuxuu ku aqbali doonaa su'aal la'aan.
- In si caddaalad leh laguula dhaqmo oo daacadnimo ah waqtiyadoo dhan laguna ixtiraamo.
- In lagula socodsiiyo waxa socda marxaladaha baaridda oo dhan
- Haddii aan dhahno waxaas ayaa la sameyn doonaa, waa la sameyn doonaa.
- Baaritaannada waxaa loo sameyn doonaa si cilmi ku dhisan.

Oggolaanshadaada ayaa lagu xukmin doonaa xadgudbeyaasha arrin kasta oo suuragal ah.

- Waxaa si joogto ah kuula soo xiriiri doona sarkaalka deegaankaaga.
- Saraakiishu waxay shakshi ahaan kuula socodsiin doonaan wixii ka soo baxa baaritaanka.
- Waxaad fursad u heli doontaa inaad nala socodsiisid sidaad u aragtid habka arrinkaaga wax looga qabtay.

Maxaad sameyneysaa haddii aadan ku qancin adeegga booliiska?

Ujeeddada Booliiska Nottinghamshire waa in uusan dhibbane waxyeellen cunsuriyadeed ku qanci waayin adeegga loo qabtay. Haddii aadan ku faraxsaneyn sida arrinkaaga wax looga qabtay, u sheeg sarkaalka arrinka gacanta ku haya si markaas ay isugu dayaan iney arrimaha saxaan.

Haddii aadan weli ku qanacsaneyn, la xiriir Taliyaha Saldhigga Xaafadda ee mas'uulka ka ah gacan ku haynta xaafaddaada. (Qofka uu yahay waxaad ku ogaan kartaa adigoo telefoon u garaaca 011 9670 999).

Haddii taasi ay xallin weydo wel welkaaga waxaad xaq u leedahay inaad dacwad toos ah oo ka dhan ah booliiska sameysatid adigoo la hadlaya kormeeraha jooga saldhigga booliiska, ama adigoo warqad u qoraya Madaxa Askarta ee jooga Sherwood Lodge, Amold, Nottingham, NG5 8PP.

Maxaa la sameeyaa haddii aad noqotay dhibbane waxyeelleyn cunsuriyadeed?

Dhibbane waxyeello cunsuriyad ku dhisan ayaa yiri in wax ka qabashada dareenka ay iyadu keento uu yahay mid wax ka qabashadiisu ay adag tahay. Garashada wixii la sameyn lahaa iyo waxa la sameyn karo iyadoo wakiil lagaa yahay wax bay caawin kartaa. Haddii uu shil dhaco:

- Soo sheeg.
- Xaqiiji in booliisku ogaado inaad rumeysan tahay inuu shilku yahay mid cunsuriyadeed iyagana u sheeg.
- Xaqiiji inaad heshid magaca iyo lambarka sarkaalka aad la hadashay. Taasi waxay kaa caawineysaa haddii aad dooneysid inaad mar kale sarkaalka la xiriirtid iyo haddii aad dooneysid inaad hay'ado kale la hadashidba.
- Kaydso diiwaanka waxa booliisku sameeyey iyo wax ay kuu sheegeen inta arrinku socdo.
- Xaqiiji in lagu siiyo lambarka denbiga (taas waxaa laga yaabaa inaan si deg deg ah loo helin, waxaase laga yaabaa iney saraakiishu taariikh danbe ku siiyaan).
- Marna ha isku taaban waxyaalaha laga yaabo in loo isticmaalo daliil ahaan. Tusaale hub, dhar, warqado, qoraallo, iwm. Waxaasoo dhan booliiska ayaa laga yaabaa iney arrinkaaga u isticmaalaan.
- Kaydso diiwaanka shilka (shilalka). Ku dar faah faahin kasta oo aad xusuusan kartid, tusaale; taariikhda, waqtiga, astaamaha xadgudbeyaasha, ereyada dhabta ah ee la isticmaalay iyo sida ay kuu saameeyeen (dhaawac, handadaad, iwm). Buug xusuus qor ah ayaa ku waxyaabahaas ku habboon. Tani waxay kaa caawin doontaa markaad bayaan sameyneysid halkii aad waxaasoo dhan ka xusuusan lahayd mar danbe.
- Codso in la sawiro wax kasta oo muujinaya wixii dhacay tusaale waxyeellada loo geystay hantidaada, cay meel lagu qoray, iwm. Booliiska iyo qoleyaasha qaarkood ayaa taa sameyn kara. Haddii aad awooddid, adiga laftaadu sawirro ka qaad.
- Haddii ay jiraan wax markhaatiyo ah, qoro magacyadooda iyo cinwaannadooda. Weydiiso iney kuu qoraan waxay arkeen iyo waxay maqleen hana kuu saxiixeen.
- Haddii qof la dhaawacay, xaqiiji in takhtar loo geeyo ama isbitaal la geeyo. Dhaawacyada la arki karo sawirro ha laga qaado.
- Kaydso diiwaanka wixii kharashyo ah ee kaaga baxay (nooliga gaariga isbitaalka lagu aaday, wixii kasab ah ee lumay, iwm). Codsi magdhow ayaa maxkamadda laga sameysan karaa.

Muxuu Booliisku ka qaban karaa waxyeellada cunsuriyadda ku dhisan?

Shilalka waa la baari doonaa iyadoo la adeegsanayo dhammaan awoodaha uu booliisku u haysto denbiyada. Waxaa laga yaabaa iney ka mid noqdaan ka soo qaadidda odhaahyada markhaatiyada, helidda daliil baarid (samballada sawirka faraha iyo DNA-da) iyo xogwareysiga kuwa la tuhunsan yahay.

Mar kastoo ay suuragal noqoto, booliisku wuxuu mar walba xabbisi doonaa kuwa lagu tuhunsan yahay arrimaha waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan. Marka kuwa la tuhunsan yahay la xukumo, shuruudo rafcaanka lagu xiro ayaa laga yaabaa in lagu soo rogo si looga hortago waxyeelleyn kale.

Booliisku wuxuu kaloo taageeri doonaa tallaabooyinka rayikda ee ay qaadaan hay'adaha kale, sida guri ka saaridda iyo amar maxkamad soo saaridda.

Sharciyada guud ee booliisku leeyahay sida weerarka iyo waxyeelleynta; waxaa sii dheer Sharciga Kala Danbeynta Dadweynaha inuu ka dhigayo mid sharci liddi ku ah iney gacan ka hadal kuugu hanjabaan ama ay si ula kac ah aflagaaddo kuugu sameeyaan ama kuu caayaan.

Waxyeelleyn ula kac ah waxay lid ku tahay sharciga. Haddii uu qof si ula kac ah kuu waxyeelleeyo hal mar ka badan waa sharci darro marka laga eego Dhowridda Sharciga Waxyeelleynta.

Ugu danbeyntii, marka arrimaha maxkamadda lala aado, Sharciga kala Danbeyn La'aanta iyo Denbiyada ayaa xaqiijiya in xadgudbaha la siiyo jumlado waaweyn o loogu talogalay aflagaaddada haddii al tusay iney ku dareen cadaawad cunsuriyad ku dhisan ama cunsuri ahaan loo soo kiciyey.

Caawinada kale ee ka dhanka ah waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan.

Sida booliiska oo kale, ururrada kalena waxay ku deeqi karaan caawino, taageero iyo tallaabo laga qaado waxyeellada cunsuriga. Kuwaani waa meelaha aad ka heli karaysid caawino:

Goleyaasha

Golaha deegaankaagu wuu ku caawin karaa haddii lagu waxyeelleeyey ama lagu takooray. Goluhu wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan dadka deegaanka deggen ee maahan kireysteyaashooda oo keliya. Faah faahinta sida loola xiriirayo waxaa laga helayaa buugga telefoonnada.

Qareennada

Qareennadu waxay dadka ka joojin karaan iney ku waxyeelleeyaan iyagoo maxkamadda weydiisanaya iney amar joojin ah u soo saarto. Amarka joojintu waa amar maxkamadda ka yimaada oo dadka u sheegaya waxyaabaha laga joojiyey iney sameeyaan, sida ineysan gurigaaga agtiisa imaan. Amarka maxkamaddu faa'iido ayuu leeyahay maxaa yeelay si deg deg ah ayaad u heli kartaa isla markaana maxkamaddu uma baahna caddeyn si ay amarka u soo saarto halka uu booliisku uga baahan yahay markay qof xukminayaan. Qareennada qaarkood talobixintooda ugu horreysa bilaash ayey ku bixiyaan.
Lambarrada telefoonka waxaa laga heli karaa Bogagga Jaallaha ah.

Nottingham & Golaha Sinnaanta Jinsiyadda Degmada (REC) 0115 958 6515

REC waxay dhibbaneyaasha waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan ee Nottinghamshire ugu deeqdaa talobixin iyo taageero. Waxay la shaqeeyaan goleyaasha, booliiska iyo hay'adaha kale. REC waxay kaloo bixin kartaa taageero weyna ku matali kartaa haddii takoor cunsuriyadeed uu kaa helay dhinaca shaqada, guriyeynta ama arrimaha socdaalka.

Golaha Afro-Kariibiyaanka & Aasiyaanka 0115857 8853

Golaha Afro-Kariibiyaanka & Aasiyaanku wuxuu ku deeqaa taageero iyo talobixin ku saabsan arrimo badan oo ballaaran oo saameynaya mujtamacyada dadka madow. Shilalka cunsuriyadda ayaa la soo tebin karaa iyadoo loo soo marayo Golahaan, kaasoo weliba bixin kara faah faahinta goobaha iyo ururrada waddanka oo dhan ku yaal ee shilalka cunsuriyadda oo dhan lagu wargelin karo.

Golaha Jinsiyadda

Magaalooyinka waddanka qaar waxaa ka jira goleyaal jinsiyadeed ee deegaan kuwaasoo dadka iyo ururrada xilka iska saara waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan iyo arrimaha kale ee jinsiyaddu ay ka qayb galaan. Kuwaasi waxay bixin karaan warar ku saabsan kooxaha iyo shakhsiyaadka caawinada iyo taageerada ka dhanka ah waxyeelleynta cunsuriyadda ku dhisan ka geysan kara xaafaddooda. Faah faahin ku saabsan kooxda xaafaddaada kala xiriir meelaha soo socda:

Ashfield **01623 555 551**
Sarkaalka Wadaagga Degmada
Bassetlaw **01909 476 118 ext. 23**
Sarkaalka Wadaagga Degmada
Mansfield iyo Degmada **01623 651 177**
Sarkaalka Wadaagga Degmada
Newarka iyo Sherwood **01636 655 232**
Sarkaalka Ammaanka Mujtamaca